

GOBALKA WASHINGTON
XIRFADAHU MUHIIMKA AH
EE BOOQASHADA GURIGA

HAGAHA WADA- HADALKA KOOXDA

*Dhukumiintigaan waxaa loogu talagalay in
lagu isticmaalo Xirfadaha Muhiimka ah ee
Booqdayaasha Guriga ee Gobalka Washington
(Washington State Home Visiting).*



XIRFADAHA MUHIIMKA AH EE BOOQASHADA GURIGA EE GOBALKA WASHINGTON
HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA

TUSMADA

Hordhaca	3
Hadafyada iyo Ujeedooyinka.....	4
Habraaca Lasoo jeediyay	5

Qeybaha Xirfadaha Booqdaha Guriga

Qeybta Xirfadaha 1: Kala duwanaanshaha, Sinaanta, U Dhanaanshaha iyo Kamid Ahaanshaha: Xiriirka Wax ku Oolka ah la lahaanshaha Qoysaska.....	7
Qeybta Xirfadaha 2: Hirgelinta Wax Ku oolka ah ee Booqashada Guriga	10
Qeybta Xirfadaha 3: Xiriirka Waalidka iyo Ilmaha ka dhaxeeya.....	13
Qeybta Xirfadaha 4: Korriinka Dhallaanka iyo Ilmaha yaryar	16
Qeybta Xirfadaha 5: Qaababka Isbadalka Xiriirka Qoyska	19
Qeybta Xirfadaha 6: Caafimaadka iyo Fayo-qabka Qoyska	23
Qeybta Xirfadaha 7: Horumarinta iyo Ka qaybgalka Joogtada ah.....	26
Qeybta Xirfadaha 8: Ilmaha iyo Taageerada Bulshada	30



Fadlan naga caawi si inaad xoojiso dhukumiintigaan adigoo soo bandhigaaya ra'yigaaga iyo soo jeedintaada la xariirta horumarka. Dhammaan falcelinadu waa qarsoodi, ilaa inaad adigu doorato maahee inaad muujiso iimaylkaaga si dabagal loogu sameeyo.





HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA HORDHACA

Hagahan wada hadalka ee soo socda **waxaa loogu talagalay in lagu isticmaalo Xirfadaha Muhiimka ah ee Booqdayasha Guriga ee Gobolka Washington.** Waxaa loo isticmaali karaa kulano kala duwan sida kulanada caadiga ah ee shaqaalaha ama tababarka shaqada. Qaab dhismeedka dooda waa mid dabacsan oo go'aansan kara su'aalaha aad dooneysyo inaad waydiiso iyo inta meelood ee kartida aad rabto in kooxdu ka wada hadasho markiiba. Waxaa la soo jeediyay in 15-20 daqiiko goob kasta oo karti ah loo qoondeeyo dood macno leh. Marka la eego soo jeedintan, tixgeli inaad soo bandhigto hal ama laba aag oo keliya ee macnaha guud leh oo la xariirta kulanka caadiga ah. Ka hadlida hal ama laba goobood oo karti xirfad waxay noqon kartaa shayga caadiga ah ee ajandaha shirka muddo asbuucyo ama bilo ah. Fikrad kale ayaa ah in la daboolo wax ka badan laba sharaxaad oo goob marka la eego dhacdooyinka tababarka shaqada ee dheer. Marka la eego barnaamijaaga iyo aqoonta bulshada iyo doorka Kormeeraha ee booqdayasha Guriga, waxaad joogtaa booska ugu fiican ee aad go'aan oga gaari karto habka ugu wuxtarka badan ee loo qaabeeeyo loona fududeeyo wax ka barashada kartida asaasiga ah ee shaqaalaha.



Si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah, fadlan booqo webseedka Waxbarashada Dhallaanka oo ah StartEarly.org/CoreCompetencies ama kooxdeena iimayl toos ah ugu soo dir HVStartEarlyWA@StartEarly.org



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
HADAFYADA IYO UJEEDOOYINKA

Hadafyada Aasaasiga ah:

Hadafka koowaad ee dooda la fududeeyey waa in la horumariyo oggaalada la wadaago iyo iyo fahanka xiriirka [Xirfadaha Muhiimka ah ee Booqashada Guriga ee Gobalka Washington Tayada](#) nooca booqashada guriga ee uu bixiyo barnaamijka iyo waajibaadyada shaqada ee Booqdayaasha Guriga.

Ujeedooyinka Muhiimka ah:

- Qoto-dheeraynta wada shaqeynta kooxda, fahamka, iyo lahaanshaha wada jirka ah ee adeegyada tayada sare leh ee ku saleysan xirfadaha aasaasiga ah ee kiraystayaasha.
- Aqoonsashada ilaa xadka uu aag kasta khuseeyo shaqadaada qoysaska, marka la eeggo astaamaha aasaasiga ah ee adeegyada booqashada guriga ee barnaamijkaaga.
- Horumarinta aqoonta shaqada ee dabeecada iyo waxa ku jira awoodaha asaasiga ah.
- Taageer u diyaargaroogwa booqdaha guriga si uu u dhammeystiro [Is-qiimeynta iyo Qorshaha Horumarinta BOOQDAHA GURIGA](#) oo loo qorsheeyay in lagu wargeliyo qorshayaasha shaqsiga ee koritaanka xirfadeed ee joogtada ah iyo guusha dadka dhaley, waalidiinta, daryeel bixiyaasha, iyo carruurta.



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA

HABKA LASOO JEEDIYAY

Waxaa jira habab badan oo wax ku ool ah oo loo maro wax ka ogaanshaha kooxda ee aagagga kartida Booqda Guriga!

Mid kasta oo ka mid ah sideeda aag ee qeexitaanada wuxuu ka kooban yahay dhawr oraah oo tilmaamaya diirada arrinka weyn ee booqashada guriga. Inkastoo doodu aanay diirada saarayn xirfadaha gaarka ah ee raacaaya sharaxaada, qaar ka mid ah xirfadaha lagu xusay kolamka “**OGGOOW**” iyo “**SAMEE**” waxayna u badan tahay in loo aqoonsado doodaha su'aalaha aad waydiiso.

Liiska su'aalaha doodaa ayaa la bixiyay oo aad ka dooran karto aadna xulan karto inay ku habboon tahay caqabadahaaga wakhtiga. Sameynta hab iyo su'aalo adiga kuu gaar ah si aad u gaarto yoolka la mid ah ama ku habboon doodda aad ayaa loo dhiirigelinaya.

Kahor inta aadan bilaabin:

- Go'aanso goobta aad dooneysyo inaad u isticmaasho dooda. (Tababarka? Kulanka Shaqaalaha? Wax kale?)
- Go'aanso mid kamid ah aagga sideed xirfad ee aad qorsheyneyso inaad wax ka oggaato.
- Go'aanso su'aalaha aad dooneysyo inaad isticmaashid si aad u fududayso doodaha ka soo baxa su'aalahaaga ama horumarinta su'aalahaaga. Si aad u taageerto go'aanka su'aalaha la iswaydiinaayo, waxaa laga yaabaa inaad dooneysyo inaad dib u eegto liiska “WAXA LA YAQAAN” iyo “OGGOOW” ee xirfadaha gaarka ah ee la xiriira aagga laga hadlayo. Qeyb kasta waxaad ka helaysaa halkaan: <https://www.startearly.org/where-we-work/washington/home-visiting-core-competencies/>
- Ugu yaraan hal usbuuc ka hor inta aan la gaarin doodaa la muddeeyey, u sheeg cida ka qaybgalaysa ujeedada, goobta kartida laga hadlayo, iyo 2-4 su'aalood ee la weydiinaayo goob kasta oo karti ah in laga dodo.



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA

HABKA LASOO JEEDIYAY

Habka la soo jeediyay waa in la akhriyo sharaxaada aagga kartida oo dhan ka dibna la weydiyo 2-4 su'aalood oo la xiriira. U oggoloow waqtii looga jawaabo su'aalo kasta si looga hadlo (qiyaastii 15-20 daqiiqo goob kasta). Hirgeliyaha dooda ka ahaan, waxaad arki doontaa ogeysiisyo ku taageeraya.



Astaanta **faalada** waxay muujineysaa wax aad dhici karto ama aad ku biirin karto erayadaada.

Su'aasha
1

Astaanta **su'aasha** waa wax aad waydiin karto kooxda. (loo lagu lambareeyay sida ay u kala horeeyaan Su'aasha 1, Su'aasha 2, iwm.)



Astaanta **tallada** waxau bixisa fududeyn iyo kobcinta dooda. Sidoo kale **tallada** waxay bixisa hagid aad ku dari karto shaqaalaha jawaabaha laga sameeyo su'aalaha. Waxaa jira faa'idooyin la xariira in la sameeyo hab joogto ah si loo fududeeyo doodaha meel kasta sida hoos lagu soo bandhigay.

Hase yeeshee, xor u noqo inaad isbadel sameyso si shaqaaluhu ugu mashquulaan oo ay uga qayb qaataan siyaabaha aad u aragto inay ku habboon yihiin.



1. QEYBTA XIRFADAHA: **KALA DUWANAANSHAH, SINAANTA, U DHANAANSHAH IYO KAMID AHAANSHAH: XIRIIRKA WAX KU OOLKA LEH EE QOYSASKA**



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



"Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo
fikradaha ku saabsan qeybta kartida."

SHARAXAADA: Fahamka Booqdaa Guriga iyo ixtiraamka dhaqanka qoyska ayaa aasaas u ah xidhiidh booqasho guriyeed oo wax ku ool ah. Ixtiraamka dhaqanka qoyska wuxuu u baahan yahay kalsooni lagu qabo qiimaha kala duwananshiyaha, sinnaanta, ka mid noqoshada, iyo ka mid ahaaanshaha marka lala kaashanayo qoysaska iyo daryeelayaasha. Booqdayaasha Guriga waxay ku celcelin doonaan ixtiraamka is-hoosaysiinta waxayna kobcin doonaan jawi waxbarasho oo sii socota ee ku saabsan dhaqanka iyo jinsiyadda.

Su'aasha
1

Miyaad ku raacsan tahay ama diidan tahay in arrintaan ay tahay aag muhiim ah oo karti u leh horumarinta shaqadaada qoyska?

Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaaloyin ay shaqaaluhu bixin doonaan si ay u taageeraan jawaabahooda.

Su'aasha
2

Waa maxay qaar kamid ah qaababka aad wax oga baraneyso dhaqanka qoyska?

Wax ka baro waxyaalaha ay sameeyaan oo ay la hadlaan qoysaska si ay u bartaan dhaqankooda.



1. QEYBTA XIRFADAHA: **KALA DUWANAANSHAH, SINAANTA, U DHANAANSHAH** **IYO KAMID AHAANSHAH: XIRIIRKA WAX KU OOLKA LEH EE QOYSASKA**

**Su'aasha
3**

Majiraan qaabab koox barnaamij ahaan aan u xoojin karno waaya aragnimada qoysaska si ay u dareemaan in dhaqankooda la fahmay lana ixtiraamaayo?

Aruuuri fikradahooda. Ku dar tusalooyin ay ka mid yihiin inay wax badan ka bartaan dhaqanka qoysaska bulshadeena, ku turjumida agabka barnaamijka luuqada qoysaska, u doodida ilo dhaqamo gaar ah la xariira, iwm.

Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada ee ficol ahaan qoysaska lagu soo booqday barnaamijka iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto horumarinta arrimaha la xariira doorkooda booqde guri ka ahaan. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.





HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____



1. QEYBTA XIRFADAHA: **KALA DUWANAANSHAH, SINAANTA, U DHANAANSHAH, IYO KAMID AHAANSHAH: XIRIIRKA WAX KU OOLKA LEH EE QOYSASKA**
-
-
-
-
-
-
-





2. QEYBTA XIRFADAHA: HIRGELINTA WAX KU OOLKA LEH EE BOOQASHADA GURIGA



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo
fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Booqdayaasha Guriga waxay la shaqeeyaan waalidiinta iyo daryeelayaasha booqashooyinka si ay u gartaan baahida qoyska iyo yoolalka, marka loo eego macnaha guud ee dhaqanka iyo bulshada, duruufahooda hadda, iyo deegaanka ay ku nool yihiin. Booqashooyinka waxaa lagu bixiyaa si waafaqsan qaabka booqashada guriga iyo habdhaqanka ururka barnaamijka.

**Su'aasha
1**

Intee in le'eg ayay muhiim u tahay inaad wax ka barato dhaqanka bulshada, dhaqanka daryeel bixiyaha, bulshada, deegaanka guriga iyo xaalada waalidka ama daryeelah ka hor inta aan la samayn yoolal wax ka qabta baahiyahooda iyo danahooda?



Wakhti ku bixi furida dooda oo oggoloow soo bandhigida aragtiyo kaladuwani.

**Su'aasha
2**

Maxay yihiin qaar ka mid ah qodobada gaarka ah ee saameeya awoodda waalidka ama daryeel bixiyaha si ay horumar ugu sameeyaan ujeedooyinkooda oo sheeg qaar ka mid ah arrimaha gaarka ah ee taageeradaada oo samayn kara isbadel?



Jawaabaha dheeraadka ah haddii la rabo tusaalayaal sida taariikhda dhaawacyada, niyad-jabka, xanuunka, dhaqanka, iyo qiyamka, iwm.

**Su'aasha
3**

Waa maxay qaar kamid ah astaamaha iyo shuruudaha qeexa nooca booqashada guriga ee barnaamijkeenu bixiyo?



Dhageyso jawaabaha sida, ‘waxaan u isticmaalnaa Waalidiinta Sida Macalimiinta’; ‘waa ikhtiyaari oo xor u ah qoysaska’; ‘waxaanu booqashooyin ku tagnaa asbuuc walba’, iwm.



2. QEYBTA XIRFADAHA: **HIRGELINTA WAX KU OOLKA LEH EE BOOQASHADA GURIGA**

Su'aasha

4

Waxaa jira qaabab badan oo ay waalidka ama daryeel bixiyuhu ku dareemi karno xiriirka adiga kaala dhaxeeya. Maxaa farqi ah oo aad u malaynaysaa inuu ka dhigayo waalidka ama daryeel bixiyaha inay kuu arkaan qof iskaashi la leh?

Su'aasha

5

Waa maxay astaamaha waalidka ama daryeel bixiyaha ee sida ugu fiican u taageera horumarka ku aadan gaarista yoolkooda?

Su'aasha

6

Ma jiraan qaabab koox barnaamij ahaan aan u xoojin karno waaya aragnimada qoysaska si ay qayb oga noqdaan adeegyada aan bixino?



Aruuri fikradahooda. Ku dar tusaalooyinka aad sameyn lahayd oo aad daba geli lahayd sida wax barasho, dhageysi iyo fadhiyo barasho, gudi talo bixin, soo jeedin iyo iimaylo wargelin ah, iwm.



Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada ee ficiil ahaan qoysaska lagu soo booqday barnaamijka iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto horumarinta arrimaha la xariira doorkooda booqde guri ka ahaan. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.



Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaalooyin ay shaqaaluhu bixin doonaan si ay u taageeraan jawaabahooda. La soco wax ka barashada siyaabaha kale ee waalidka ama daryeel bixiyaha laga yaabo inay kuu arkaan. Tusaale ahaan, khabiir, macalin, wax kale?

XIRFADAHA MUHIIMKA AH EE BOOQASHADA GURIGA EE GOBALKA WASHINGTON



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____

-
-
-
-
-
-
-
-



2. QEYBTA XIRFADAHA: **HIRGELINTA WAX KU OOLKA LEH**
EE BOOQASHADA GURIGA



3. QEYBTA XIRFADAHA: ISDHEXGALKA WAALIDKA IYO ILMAHA



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo
fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Booqdayaasha Gurigu waxay aqoonsadaan saamaynta xidhiidhka waalidka iyo ilmaha ku leeyahay korriinka jireed ee caafimaadka qaba iyo horumarka shucuurta-bulsheed. Waxay Booqdayaasha Guriga fahmeen in waalidiinta iyo daryeelayashu ay khabiir ku yihin noloshooda, sidaas darteed, waxay taageeraan xiriirka waalidka iyo ilmaha marka loo eego macnaha guud ee dhaqanka, diinta, iyo bulshada qoyska.

**Su'aasha
1**

Miyaad ku raacsan tahay ama diidan tahay in arrintaan ay tahay aag muhiim ah oo kartida si aad ugu horumariso shaqadaada booqde guri oo qoys ka ahaan?



Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaalooyin ay shaqaaluhu bixin doonaan si ay u taageeraan jawaabahooda.

**Su'aasha
2**

Qaababkee ayaad u malaynaysaa in korriinka jirka ee ilmaha iyo korriinka shucuurta bulsheedka ay saamayn ku leedahay xiriirka ay la kulmaan waalidkood ama daryeel bixiyaasha?



Dhageyso jawaabaha sida, “Waalidka ama daryeel bixiyaha leh xiriirka adag ayaa laga yaabaa inay si degdeg ah uga jawaabaan calaamadaha ilmaha sida oohinta marka ay gaajoodaan ama daalan.” Ama “Waxaa laga yaabaa in ilmuu la kulmaayo xadgudub saaid ah haddii waalidku dareemaayo in ilmuu uusan jeelaan ama fahmayn dhaqanada ku habboon ilmaha.”

**Su'aasha
3**

Waa maxay qaar kamid ah tusaalooyinka siyaabaha aad u aragtay in dhaqanka qoyska, diinta, iyo bulshada ay saameyn ku leeyihin xiriirka waalidka iyo ilmaha ka dhaxeeyaa?



Dhageyso ama jawaabaha dheeraadka ah ee la bixiyay sida dhaqanka iyo diintu u qaabeeyaan waxa la aaminsan yahay ee ku saabsan doorka waalidka/daryeel bixiyaha, iyo dadka waaweyn ee kale (tusaale ahaan, abti, ayeeyo, deris, iwm.); waxa loo arko ‘dhaqan xun’ iyo shax ku habboon, iwm.



3. QEYBTA XIRFADAHA: ISDHEXGALKA WAALIDKA IYO ILMAHA

**Su'aasha
4**

Waa maxay qaababaka aad ku ogaan karto qiyamka waalidka ama daryeel bixiyaha iyo waxa ay aaminsan yihiin ee ku saabsan nooca xiriirka ay rabaan inay la yeeshaan ilmaha?



Weydii su'aalo tusaale ah ama waxyaabo ay dhagaystaan (waqtiga) si ay u sii qoto dheereeyaan fahamkooda xiriirka iyo isdhexgalka ay la leeyihii ilmaha oo saameyn ku leh dhaqankooda, diintooda, iyo bulshadooda. Dabagal ku samee adoo waydiinaaya in qof muujin karo tusaalaha waxyaabaha ay kala kulmayaan qoyska.

**Su'aasha
5**

Waa maxay qaababka aad u taageerto horumarka waalidka ama daryeel bixiyaha iyo xidhiidhka ilmaha?



Dhageyso ama bixi jawaabo dheeraad ah sida isticmaalka u fiirsashada iyo faallooyinka isdhaafsiga wanaahsan ee u dhexeeya ilmaha iyo waalidka ama daryeel bixiyasha, ku dhiirigeli waalidka in uu tixgeliyo aragtida ilmaha, ku dhiiri geli waalidka/daryeel bixiyaha xiisaha ay u qabaan tallaabooyinka koritaanka ee soo socda, iwm.

**Su'aasha
6**

Waa maxay waxyaalaha aad sheegto ama aad samayso si aad u muujiso ixtiraamka waalidka ama daryeel bixiyaha sida xushmeynta khabiernimada noloshooda iyo xidhiidhka ay la leeyihii ilmaha?



Dhageyso ama bixi jawaabo dheeraad ah sida muujinta xiisaha maqalka ee waalidka ama daryelaha caruurta, ixtiraam iyo taageer go'aamada waalidku gaadho xataa haddii aysan ahayn kuwii aan u samayn lahaa ilmahayga, iwm.

**Su'aasha
7**

Ma jiraan qaababa ka barnaamij ahaan aan u xoojin karno ama u muujin karno ixtiraamka aan u hayno doorka waalidka ama daryeel bixiyaha ay ku leeyihii go'aannada ilmaha?



Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada ee facil ahaan qoysaska lagu soo booqday barnaamijka iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto horumarinta arrimaha la xariira doorkooda booqde guri ka ahaan. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.

XIRFADAHA MUHIIMKA AH EE BOOQASHADA GURIGA EE GOBALKA WASHINGTON



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____



3. QEYBTA XIRFADAHA: **ISDHEXGALKA WAALIDKA IYO ILMAHA**



4. QEYBTA XIRFADAHA: KORRIINKA DHALLAANKA IYO ILMAHA YARYAR



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Waxay Booqdayaasha Guriga fahmaan horumarka ilmaha marka loo eego qoyskooda qiyamka, dhaqanka, iyo waxa ay aaminsan yihiin. Waxay Booqdayaasha Guriga iskaashi la sameeyaan waalidiinta iyo bixiyeyaasha si ay u taageeraan oo ay u fududeeyaan fahamka caafimaadka jireed, garashada, iyo korriinka shucuurta-bulsheed iyo korriinka carruurtooda.

Su'aasha 1

Miyaad ku raacsan tahay ama diidan tahay in arrintaan ay tahay aag muhiim ah oo kartida si aad ugu horumariso shaqadaada booqde guri oo qoys ka ahaan?



Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaalooyin ay shaqaaluhu bixin doonaan si ay u taageeraan jawaabahooda.

Su'aasha 2

Maxaad u baahan tahay inaad ka barato qiyamyada qoyska, dhaqanka, iyo waxay aaminsan yihiin ee la xiriira korriinka ilmaha?



Dhageyso jawaabaha la xiriira quudinta, hurdada, marka ay bartaan hadalka iyo socodka, iwm. Ku balaari wada sheekeysiga tusaalayaal haddii aad isleedahay waad u baahan kartaa.

Su'aasha 3

Maxay yihiin qaar ka mid ah waxyaabaha aan u baahanahay inaan ogaano haddii aan guri ku soo booqaneyno si aan u taageerno waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha arrimaha la xiriira horumarka ilmahoooda?



4. QEYBTA XIRFADAHA: KORRIINKA DHALLAANKA IYO ILMAHA YARYAR

**Su'aasha
4**

Maxay yihiin qaar ka mid ah qaababka aad ku noqonayso iskaashi la shaqeeya waalidka ama daryeel bixiyaha si ay u taageeraan horumarka ilmahooda?

 Ku dar wada hadalka haddii loo baahdo tusaalayaal sida dhisida kalsoonida, wadaagista macluumaadka ay weydiyaan, weydii waalidka ama daryeel bixiyasha haddii ay qabaan walaac, iwm.

**Su'aasha
5**

Maxay yihiin fikradahaaga iyo aragtiyadaada ku saabsan baaritaanka korriinka ee qaybta ka ah shaqadaada booqde guri ahaan?

 Wax ka baro jawaabaha su'aashaan adoo dhageysanaya fikradahooda kuna dhiirigelinaya fikrado kala duwan. Diyaari su'aalaha dabagalka ah ee la xiriira walaacyada natijjooyinka, ilaha tixraaca, waxay jecel yihiin ama aanay jeclayn qalabka ama habraaca, iwm.

**Su'aasha
6**

Waa maxay waayo aragnimada dhaawaca waxyabaha ay la xiriiro marka la eego koritaanka dhallaanka iyo ilmaha yaryar?

 Dhiiri geli doodaha ku saabsan saamaynta noocyada dhaawacyada kala duwan ee ay soo mareen waalidka ama daryeel bixiyaha, ilmaha, bulshada dhexdeeda, khibradaha dugsiga, iwm. iyo arrimaha la xiriira dabagalka gudbinta.

**Su'aasha
7**

Ma jiraan qaabab aan koox ahaan ku xoojin karno aqoontayada iyo xirfadaheena booqashada guriga ee la xiriira aagga aqoonta?

 Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada iyo qoysaska iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto horumarinta arrimaha la xariira doorkooda booqde guri ka ahaan. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.

XIRFADAHA MUHIIMKA AH EE BOOQASHADA GURIGA EE GOBALKA WASHINGTON



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____



4. QEYBTA XIRFADAHA: **KORRIINKA DHALLAANKA IYO ILMAHA YARYAR**



5. QEYBTA XIRFADAHA: QAABABKA ISBADALKA XIRIIRKA QOYSKA



Akhri Qeybta Xirfadaha **sharaxaadu** mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Waxaa Booqdayaasha Gurigu ku salaysan yihiin xoogga iyo dhaawacyada-ka dhaca dhaxoooda. Waxay ogyihiiin saamaynta aqoonsiga jinsiga, dhaqanka, iyo diinta ay ku leeyihiiin bulshada iyo nidaamka qoyska iyo ka kooban. Waxay booqdayaasha Guriga iskaashi la sameeyaan waalidiinta iyo daryeel bixiyeyaasha si ay u aqoonsadaan, u horumariyaan, oo ay u kobciyaan arrimaha ilaalintha iyo horumarinta qoyska. Waxay booqdayaasha Guriga la shuraakoobaan waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay wax uga qabtaan khataraha iyo walbahaarka saameeya fayo-qabka qoyska.

**Su'aasha
1**

Maxay kaaga dhigan tahay inaad qoyska la yeelato is dhiegalka ‘xoog ku saleysan iyo dhaawac ku saleysan’ doorkaaga booqde guri ka ahaan?



U oggoloow waqtii qof kastaa kaga jawaabo su'aasha, ama tusaale. Haddii ay muhiim tahay, wax ka baro noocda isdhiegalka ee aan ku saleysanaan doonin ‘kartida’ ama ‘waxyeellada oggaalka loo yahay’ (sida barida, xallinta dhibaatada, sameynta mala-awaalka, iwm.)

**Su'aasha
2**

Waa maxay qaar kamid ah qaababka waxyeellada loo dareemo?



Xaqiji in tusaalayaasha kaladuwani la bixiyo. Bixi wax dheeraad ah adoo sheegaya kuwa maqan ee lagu qeexay qeexitaanka. Tusaale ahaan: cunsuriyada, rabshadaha bulshada ka dhaca, waayo-aragnimada shaqsi ee la xariirta rabshada, dayacaada, iwm.

**Su'aasha
3**

Waa maxay qaababka aad ku baranayso dabeeecadda xiriirkka ka dhexeeyaa waalidka ama daryeel bixiyaasha waxay u arkaan inay yihiin ‘qoyskooda’?



Dhageyso jawaabaha sida, weydii su'aalo ku saabsan cidda ay u arkaan inay u dhow yihiin iyo xubnaha balaaran ee qoyskooda, u fiirsada dhaqdhaqaqa qoyska, dhageyso waxa laga sheegayo xubnaha qoyska, iwm. Ogow in xiriirkka u dhexeeyaa xubnaha qoyska uu isbadelo, markaa tani maahan wax u baahan in la qiimeeyo hal mar oo keliya.



5. QEYBTA XIRFADAHA: QAABABKA ISBADALKA XIRIIRKA QOYSKA

**Su'aasha
4**

Qaabab nooceee ah ayaad ula kulantay taariikhda naxdinta leh ee waalidka ama daryeel bixiyaha ee saameyay shaqadaada iyagoo guriga ku soo booqday?



Weydii tusaalooyin gaar ah. Wax ka baro sida taariikhda dhaawacu u saameyn karto: kobcinta kalsoonida ee booqdaha guriga, awoodooda inay hayaan ama bartaan macluumaaadka, sida ugu guulaysta waalidka ama daryeel bixiyaasha ay ula falgalan oo ay u sii wataan jadwalka booqashada iwm.

**Su'aasha
5**

Sidee ayay qiyamkagaa la xiriira aqoonsiga jinsiga, dhaqanka iyo diinta u saameeyaan booqashada guriga ee ay sameeyaan qoyska qiimahooda meelahaas ka duwanaan karaan?



La soco waydiinta siyaabaha ay u isticmaalaan inay ku sii jiraan 'xoog ku saleysan' xaaladahaan. Soo jeedi xeeladaha sida muujinta daacadnimada, kala hadal faraqa u dhexeeyaa kormeeraha ama ilmaha asaaga ah, iwm.

**Su'aasha
6**

Sidee bay xiriirka iyo dhaqdhaqaaqa ka dhexeeyaa xubnaha qoyska u saameeyaan shaqadaada booqdaha guriga ka ahaan?



Dhagayso jawaabaha ama kaabista adigoo sheegayo booqashooyinku ma dhici karaan haddii xubnaha qoyska isku cilaafaan midba midka kale ama aadan rabin qof gurigisa jooga; waalidka maqan ama daryeel bixiyaha waxa laga yaabaa inay diiradda saaraan booqashooyinka; Qofka qaata go'aannada ku saabsan daryeelka iyo edbinta ilmaha waxay saameeyaan taageeradayda waalidka ama daryeel bixiyaha aan la leeyahay xiriirka ugu badan; iwm.

**Su'aasha
7**

Miyaad ku raacsan tahay ama diidan tahay in arrintaan ay tahay aag muhiim ah oo karti u leh horumarinta shaqadaada qoyska?



Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaalooyin ay shaqaaluuhu bixin doonaan si ay u taageeraan jawaabahooda.



5. QEYBTA XIRFADAHA: **QAABABKA ISBADALKA XIRIIRKA QOYSKA**

**Su'aasha
8**

Waa maxay siyaabaha aad ku ogaatay inaad la wadaagto waalidiinta iyo bixiyaasha si aad u aqoonsato, u horumaris, oo aad u kobciso arrimaha ilaalinta iyo adkeysiga qoyska?

**Su'aasha
9**

Ma jiraan siyaabo aan koox ahaan ku xoojin karno aqoonteeni iyo xirfadaheena booqashada guriga ama is-taageerida midba midka kale ee la xiriira aaggan kartida?



Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada iyo qoysaska iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto horumarinta arrimaha la xariira doorkooda booqde guri ka ahaan. Magaca talaaboo yinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.





HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____



5. QEYBTA XIRFADAHA: **QAABABKA ISBADALKA XIRIIRKA QOYSKA**



6. QEYBTA XIRFADAHA: CAAFIMAADKA IYO FAYO QABKA QOYSKA



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo
fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Waxay booqdayaasha Guriga la shaqeeyaan waalidiinta
iyo daryeel bixiyeyaasha si ay u aqoonsadaan dhaqamada badqabka
iyo caafimaadka leh ee kobciya caafimaadka iyo fayo-qabka guud ee
dhaqanka, caqiidada, iyo ilaha qoyska.



**Su'aasha
1**

Waa maxay doorkaaga booqdaha guriga ka ahaan ee la xiriira aaggaan kartida shaqadaada
qoyska?



Ku dhiiri geli dhammaan xubnaha shaqaalaha inay ka jawaabaan tusaale.

**Su'aasha
2**

Waa maxay waxa muhiim ah ee la xariira aqoonsiga ‘dhaqannada badbaadada iyo caafimaadka
leh’ iyadoo lala kaashanaayo waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha?



Dhiiri gelinta wax ka barashada khataraha xiriirada haddii adiga, booqde guri ahaan ka ahaan, aad ku qeexdo
‘ammaan iyo dhaqamada caafimaadka leh’ ee ku habboon waalidka ama daryeelaha.

**Su'aasha
3**

Waa maxay waxyaabaha la xariira ‘caafimaadka iyo badqabka’?



Hubi in liis dhameystiran oo la xariira aaggaga caafimaadka iyo badqabka la aqoonsado, tusaale ahaan.,
caafimaadka jirka, shucuurta, dareenka, bulshada, dhimirka, iwm.



6. QEYBTA XIRFADAHA: CAAFIMAADKA IYO FAYO QABKA QOYSKA

**Su'aasha
4**

Maxay ku kala duwan yihii dhaqanka qoyska, caqiidada, iyo kheyraadka ay u arkaan inay yihii badqab iyo dhaqamo caafimaad leh oo kobciya caafimaadka iyo badqabka naftooda?

**Su'aasha
5**

Maxay ku kala duwan yihii dhaqanka qoyska, caqiidada, iyo kheyraadka ay u arkaan inay yihii badqab iyo dhaqamo caafimaad leh oo kobciya caafimaadka iyo badqabka ilmaha?

**Su'aasha
6**

Waa maxay tusaalaha xaaladaha kugu keena inaad ka walaacyo caafimaadka iyo badqabka xubin qoyskaaga katirsan oo keeni karta inaad wax ka qabato adoon oggolaanshahooda helin?



U fiirso xaaladaha lagu soo hadal qaaday siyaasadaha iyo nidaamyada hay'adaada iyo xaaladaha u baahan waxqabadyo sida wariye loo igmaday haddii shaqaaluhu aysan helin xaalado gaar ah oo la xariira jawaabahooda. Dabagal ku samee adigoo waydiinaya haddii uu jiro tusaale ay awoodeen inay helaan oggolaansho ama taageeran waalidka ama daryeel bixiyasha si ay u qaadaan tallaabada lagama maarmaanka ah. Faallo ka bixi doorkaaga kormeere ahaan si aad uga qaybgasho oo aad u taageerto booqdaha guriga xaaladahaan oo kale marka ay jiraan.

**Su'aasha
7**

Waa maxay xaaladaha bulsho ee saameeya caafimaadka qoyska iyo badqabkooda?



Dhageyso ama kordhi tusaalayaal sida: faafida cudur ama caabuq, daryeel caafimaad la'an ama macluumaa caafimaad oo luuqada qoyska ku qoran, helid la'an cunto cusub, gaadiid la'an ama jiritaanka xarumo caafimaad ama la-talin la heli karo, rabshad bulshada ka dhex dhacda iwm.

**Su'aasha
8**

Ma jiraan siyaabo barnaamijkeenu ku xoojin karo shaqadeena qoysaska si aan kor ugu qaadno taageerdeena caafimaadkooda iyo badqabkooda?



Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada iyo qoysaska iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto horumarinta arrimaha la xariira doorkooda booqde guri ka ahaan. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____



6. QEYBTA XIRFADAHA: **CAAFIMAADKA IYO FAYO QABKA QOYSKA**



7. QEYBTA XIRFADAHA: HORUMARINTA IYO KA QAYBGALKA JOOGTADA AH



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo
fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Waxay booqdayaasha Guriga si joogto ah wax uga bartaan
qoysaska, saaxibada, iyo dadka kale. Waxay sameeyan xidhiidh wada
shaqayneed oo wax ku ool ah oo ay la yeeshaan Kormeerahooda si ay
shuraako ugu noqdaan horumarka xirfadeed ee socda. Waa muhiim dadka
soo booqda guriga inay ku koraan xirfadaha iyo kartida iyo inay ku sii
jiraan aqoonta cilmi baarista ee saameeya dhaqanka booqashada guriga,
isbeddelada xaaladaha bulshada, iyo agabyada la heli karo. Ballanqaadka
waxbarashada joogtada ah ayaa lagama maarmaan u ah Booqdaha Guriga
si ay u noqdaan kuwa wax ku ool u ah iskaashiga qoysaska.

**Su'aasha
1**

Miyaad ku raacsan tahay ama diidan tahay in arrintaan ay tahay aag muhiim ah oo kartida si
aad ugu horumariso doorkaaga booqde guri ka ahaan?



Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaalooyin ay shaqaaluhu bixin doonaan si
ay u taageeraan jawaabahooda.

**Su'aasha
2**

Waa maxay waxyaabaha aad ka baratay qoysaska ee muhiimka u ahaa shaqadaada Booqde
guri ka ahaan?

**Su'aasha
3**

Waa maxay waayo aragnimada ama tallooyinka aad baratay ama aad la wadaagtay Soo
booqdayaasha kale ee Guriga kuwaas oo muhiim u ahaa wuxtarkaaga Booqde Guri ka ahaan?



Dhiirigeli tusaalayaal badan si loo qoro.



7. QEYBTA XIRFADAHA: HORUMARINTA IYO KA QAYBGALKA JOOGTADA AH

**Su'aasha
4**

Yaa kale oo gacan muhiim ah ka geystay kor u qaadista xirfaddaada iyo waxtarkaaga ee ku aadan doorkaaga Booqde Guri ka ahaan?

Dhiirigeli tusaalayaal badan si loo qoro.

Sheeg siyaabaha aad dooneyso in ay kuguula kulmaan adigoo ah Kormeerehooda iskaashiga kobaca xirfadaha.

**Su'aasha
5**

Waa maxay qaybaha cilmi baarista ee muhiimka u ah in lasii noqdo Booqde guri?

Meelaha aan soo sheegnay waxaa ka mid ah maskaxda/cilmiga neerfaha, daryeelka uurka, korriinka ilmaha, caafimaadka hooyada, daryeelka dhaawacyada oggaalka loo yahay,baaritaanka korriinka, iwm.

**Su'aasha
6**

Sideed kula socod kartaa xaaladaha bulshada iyo agabka?

Badi jawaabaha shaqaalaha haddii loo baahdo. Lasoco adigoo xusaya in goobtaan tahay meel aan ka baran karno qoysaska iyo waaya aragnimadooda haddii aan la xusin. Su'aasha dabagalka ah waxay noqon karaan in la weydiyo haddii qof uu haysto wax uu wadaago oo ku saabsan dhacdooyinka u dambeeyay ee bulshada ama kheyraadka.



7. QEYBTA XIRFADAHA: HORUMARINTA IYO KA QAYBGALKA JOOGTADA AH

**Su'aasha
7**

Waa maxay ilaha lagu kalsoonaan karo ee la xariira macluumaadka iyo cilmi-baarista aad isticmaasho?

 Ogoow ilo kala duwan oo ay ku jiraan webseedyada, joornaalada, tababarka, shirarka, wargeesyada, iwm. oo ay ku jiraan kuwa aad inta badan isticmaasho.

-
-
-
-
-
-
-
-

**Su'aasha
8**


Ma jiraan habab aan koox ahaan ku xoojin karno helitaanka ilo lagu kalsoonaan karo oo cilmi baaris, macluumaadka iyo horumarinta aqoonta, xirfadaha, iyo kartida booqashada gurigeena?

 Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan marka la eego kartida xirfada iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto koritaankooda iyo horumarkooda Boqde guri oo waxtar leh. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.



HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA

Taariikhda: _____



7. QEYBTA XIRFADAHA: **HORUMARINTA IYO KA QAYBGALKA JOOGTADA AH**



8. QEYBTA XIRFADAHA: KHEYRAADKA IYO TAAGEERADA BULSHADA



Akhri Qeybta Xirfadaha
sharaxaadu mid kore.



“Aan wax ka baarno fikradahaaga iyo
fikradaha ku saabsan qeybta kartida.”

SHARAXAADA: Waxay booqdayaasha Gurigu aaqoon u leeyihii isku-xidhka ilaha bulshada iyo ikhtiyaarka gudbinta ee ay heli karaan qoysaska. Waxay booqdayaasha Guriga iskaashi la sameeyaan waalidiinta iyo bixiyeyaasha si ay u aqoonsadaan, u helaan, u maraan nidaamyada, oo ay ugu doodaan naftooda iyo carruurtooda.



**Su'aasha
1**

Miyaad ku raacsan tahay ama diidan tahay in arrintaan ay tahay aag muhiim ah oo karti u leh horumarinta shaqadaada qoyska?



Wakhti ku qaado si aad wax oga barato sababaha ama weydii tusaalooyin ay shaqaaluhu bixin doonaan si ay u taageeraan jawaabahooda.

**Su'aasha
2**

Waa maxay qaar ka mid ah gudbinada ugu caamsan ee aad u sameyso adeegyada bulshadeena?



Iyada oo la adeegsanaayo jawaabaha ay shaqaaluhu ka bixiyaan su'aasha, samee liis dheer oo koox. Si qoto dheer u dooda adoo wax ka baranaaya tixraacyo kala duwan sida guri, cunto, xafaayad, caanaha naaska, arrimaha sharciga, caafimaadka dhimirka, caafimaadka, arrimaha dhallinta, degdeg, iwm.

**Su'aasha
3**

Maxay yihiin qaar ka mid ah sababaha waalidka ama daryeel bixiyaha ay u raaci waayaan gudbinta?



Wax ka baro sababo kala duwan oo ku saleysan waayo aragnimadooda qoysaska sida cabsida, waayo aragnimadii dhallaanka, adeegyada aan ku qornayn luuqadooda hooyo, u diyaarsanaanta isbadelka ama awoodda waxqabad, gaadiid, kharash, iwm.



8. QEYBTA XIRFADAHA: KHEYRAADKA IYO TAAGEERADA BULSHADA

**Su'aasha
4**

Waa maxay qaar ka mid ah siyaabaha aad ula wadaagto waalidiinta/daryeel bixiyaasha si aad u taageerto ayadoo loo maraayo tixraac?

 Hubi in la sheego tusaalooyin ay ku jiraan siyaabaha ay ula xiriiraan waalidka ama daryeel bixiyaha marka ay ku hawlan yihii adeegyada, hubinta in waalidiinta/daryeellayaashu ogaadaan xuquuqdooda iyo ikhiyaarkooda, horumarinta xiriirka lala yeesho Hay'adaha gudbinta, wax ka waydii waayo aragnimadooda ururka gudbinta, iwm.

**Su'aasha
5**

Ma jiraan siyaabo aan koox ahaan ku xoojin karno aqoonta iyo xiriirka midba midka kale la leeyahay hay'adaha gudbinta si ay u daboolaan baahiyaha qoysaska ee barnaamijkeena?

 Ku xir dooda fikradahaaga ku saabsan muhiimada goobtaan karti xirfada iyo qoysaska iyo shaqadaada kormeere ahaan si aad u taageerto dhinacaan/hawlaahan adeegyadooda qoysaska. Magaca talaabooyinka aad go'aansato inaad qaado marka la eego jawaab-celintooda. Sidoo kale, wax ka baro tababar kasta oo soo socda ama fursadaha kale ee waxbarashada ee ay heli karaan ayaga lana xidhiidha aaggaan kartida.

XIRFADAHA MUHIIMKA AH EE BOOQASHADA GURIGA EE GOBALKA WASHINGTON



**HAGAHA WADA-HADALKA KOOXDA
OGEYSIISYADA IYO DIB U MILICSIGA**

Taariikhda: _____



8. QEYBTA XIRFADAHA: **KHEYRAADKA IYO TAAGEERADA BULSHADA**
